

Qorshaha Pro-Equity Anti-Racism (PEAR,
Ka hortaga Hayb Nacaybka ee Taageerada Sinaan) iyo iyo Buugga Tilaamaha

Tara Smith 0:01

Magacaygu waa Tara Smith, waxaana ku faraxsan nahay inaan noqdo Agaasimaha Department of Enterprise Services (Waaxda Adeegyada Ganacsiga). Maanta, waxaa sharaf ii ah inaan idin la wadaago bayaanka wakaalada iyo taageerada Amarka Fulinta ee Gudoomiye Inslee 22-04. Amarkaan fulinta ayaa dhaqan gelinaaya Qorshaha Pro-Equity Anti-Racism (Ka hortaga Hayb Nacaybka ee Taageerada Sinaan, ama PEAR) iyo Buugga Tilaamaha. Wuxuu sidoo kale ku amrayaa dhammaan wakaaladaha dawlada inay dhaqan geliyaan Qorshaha Talaabada Istaraatiijiga ah ee PEAR. Gudoomiye Inslee ayaa dejiyay higsii lagu dhisaayo nidaamka PEAR dhammaan gobalka Washington. Wuxuu cadeeyay in hogaamiyaha wakaalad kasta uu masuul ka yahay lagulana xisaabtami doono gaarista natiijoyinka PEAR. Marka anoo adeegsanaaya bayaankaan, waxaan xooga saarayaa arrintaas. Haddii aan nahay Department of Enterprise Services (Waaxda Adeegga Ganacsiga), ama DES, waxaan saamayn ku leenahay adeegyo badan oo gobalka oo dhan quseeya. Waxaan aqoonsan nahay in ku milida mabaadii'da isku dhafnaanta, sinaanta iyo wadajirka dhammaan qaybaha shaqadeenu ay muhiim u tahay fulinta shaqdeena xoojinta ganacsiga dawlada. Sidoo kale, waa waxa saxda ah in la sameeyo.

Dr. Adrian Thompson 1:32

Magacaygu waa Dr. Adrian Thompson, waxaan ahay Madaxa Xafiiska Sinnaanta ee waaxdaan Department of Enterprise Services. Shaqadaan ayaa muhiimad wayn noo leh. Inkastoo aanaan badeli karin falalka guumaysiga iyo takoorka ku dhisnaa ee lasoo maray, waxaan maamuli karnaa dhaqanka hadda ee goobteena shaqada, iyo adeegyada aan siino dawlada gobalka iyo tan hoose.

Tara Smith 2:00

Kooxdayda Hogaaminta, oo si dhow ula shaqaynaysa Kooxdeena cusub ee PEAR ee DES, waxay diirada saaraysaa dhisida awooda muhiimka u ah u fulinta shaqadaan qaab macno leh. Waajibaadkeena ayaa aad u kaladuwan dhammaan waaxaha kaladuwan ee shaqada degmada. Laakiin waxaan ognahay in mid kasta oo naga mid ah ay qasab tahay inuu qaybtiisa ka qaato si loo hubiyo inaan si buuxda u kaashanayno macaamiisheena iyo saamileeyda kale.

Jason Marquiss 2:27

Magacaygu waa Jason Marquiss waxaana ahay Madaxa Hawlgallada ee waaxdaan DES. Wajigaan hore ee Qorshaheena Istaraatiijiyada ee PEAR, waxaan waqti xaadirkaan doonaynaa saddex Maalgashiyada Adeegga PEAR ah. Marka koobaad, waxaan dhisi doonaa oo aan ka dhaqan gelin doonaa Qorsheheena Talaabada Istaraatiijiga ah dhammaan qaybaheena Hogaaminta, Shaqooyinka iyo Adeegga si loo taageero yoolalka sinaanta ee wakaalada, iyo sidoo kale yoolalka dhammaan wakaaladaha gobalka ee kale aan taageerno. Marka labaad, waxaan abuurin doonaa istaraatiijiyada aruurinta fikradaha bulshada

taasoo xaqiijin doonta toosnaanta ganacsiga oo kobcinaysa wada shaqeynta PEAR iyo iskaashiga bulshada. Iyo marka sadexaad, waxaan abuur doonaa farsamooyin si loo taageero wakaaladaha yaryar ee DES ay siiso adeegyada si looga caawiyo inay yeeshaan awood ay ku fuliyaan istaraatiijiyadaha PEAR oo saamayn wanaagsan ku yeelan doona macaamiishooda iyo xubnaha bulshada.

Tara Smith 3:33

Waxaa sharaf ii ah inaan hogaansho shaqada wakaaladaan, waxaana ku faraxsan nahay inaan hormarkeena idin la wadaago mid kasta oo idin kamid ah, iskaashatadeena, iyo Xafiiska Sinaanta. Waxaan jeclaan lahaa inaan helo fikirkiina ku aadan hormarka aan gaarnay mudadaas, meesha aan hormar ka samayn karno, iyo sida aad uga qaybgeli kartaan dhisida nidaam nololeed oo taageeraaya sinaanta, kahortagaaya habayn sooca. Mahadsanidiin.